Gacal iyo Gayaan

Dooraahada magaca dhiganaha:



Magaca dhiganuhu, wuxuu sidaa cilmi aad u baaxad weyn oo aan haddii la faalleyn tago aan laga dhammaaneyn. Labada eray ee magac bixinta dhiganuhu ay ka kooban tahay ee GACAL IYO GAYAAN Waa laba eray oo macno badan xambaarsan. Sidoo kale waxay ka mid yihiin erayada is jellida ama is rogroga.

GACAL

Gacal asalkiisii hore wuxuu ahaa: "KALGACAL" Balse, qarniyo fog dabadood ayuu eraygii u dhalanrogtey GACAL. Waxa booskii ka baxay: "KAL" Kal waa qofka gudihiisa ama laabtiisa waxa ku jira. Soomaalida ayaa ku mahmaahda: "Kashiisa wixii ku jira qofka, korkiisaa laga kasaa". Haddaba eraygu markii uu noqday: "GACAL" wuxuu yeeshay hab adeegsi kala duwan, taas oo u sababtay, inuu dhowr macno sheeyo. Tusaale:

1. Mar waa magac **LAB**. Waa magac ay soomaalidu ula baxaan wiilasha.
2. Mar waa gacal, sida: **xigaal, ehel, GARAB, tol iyo aqribo.**
3. Mar waa rabitaan, **jaceyl iyo xiiso**. Sida laba qof oo is doonaya ama is xodxodanaya.
4. Markalena waa eray **DHEDDIGOOBA,** sida marka aynu dhahno: GACALISO ama GACALLEEY oo loola jeedo qof dumar ama noole dheggid oo kale. Sh. Axmed Wacdiyow (AUN) ayaa masafo ku yiri:

"Gabari waa GACAL waana guul Rabbi
Waa garka wadnahoon la goyn karin
Laba gummood gebinow dhex yaallaa
Kala go'ooda middii gariiftee
GACALADII isu geysay maahoo
Gabari waa GACAL waana guul Rabbi"

GAYAAN

Gayaan asalkiisii hore, wuxuu ahaa: GEYAAN. Wuxuuna tilmaamayaa laba ruux oo guur ahaan is geya ama uu guur dhex mari karo. Waa sida GACAL oo qarniyo hore ayuu u soo degarogtey **GAYAAN**.

Tilmaantaas kooban dabadeed, dhigane qofkii qoray, wuxuu la mid yahay qof beer abuuray ama beeray. Miraha kasoo baxa beertaas ama laga gurtona, waxay ku xiran tahay: hadba beeraha iyo doorashadiisa. Dhiganayaashuna waa sidaas oo kale, gurashada miraha dhiganaha ka soo baxaa waxay ku xiran tahay: **CUGASHADA DHIGAHA. Dhilidda erayada, abuuridda fikirka, falkinta sheekada iyo farshaxameyntuba waxay ku xiran yihiin af-aqoolnimada dhigaha.**

SHEEKADA GACAL IYO GAYAAN



Sheekada: **GACAL IYO GAYAAN** waa sheeko dhex mareysa labo dhallinyaro oo reer guuraa ah. Waa sheeko ay jilayaan labadaas dhallinyarada ah oo magacyadooda la kala yiraahdo: ***"Dhaashane*** iyo ***Dheeho"*** sheekada waxa ku jira boqollaal qofood oo kale, qof walbana hab iyo si ayey sheekada ku soo gelaysaa oo ay uga qeyb qaadaneysaa. Labadaas dhallinyarada ah ayaa waxay gelayaan jiidaal dheer. Socdaal maalmo badan qaadanaya. Dhulka ay ku socdaalayaan waa dhul aaney ku nooleyn Aadane, balse noolaha kale ee carun ku noolka ah ay ku badan yihiin, sida: Libaaxa, dhurwaaga, uuleyda, shabeelka, jiifaaga, weerka, dhidirka iyo dhammaan inta micida ama cijada wax ku ugaarsata iyo inta kale ee doorjoogta ah ee la ugaarsado oo aadanaha iyo habar-dugaaguba ay wada cunaan hilibkooda. Labadaan dhallinyarada ah ee jiidaalka dheer ku socdaalaya ayaa waxa dhexmaraya xariir doonitaan, kuna dhisan yagleelidda guri negi oo xalaal ah. Inta ay socdaalayaan ayeyse la kulmayaan halako libaax iyo halis waraabe, taas oo ay siyaabo kala duwan ula falgelayaan.

Golihii uu majiirahooda ahaa marka ay gaaraan, ayaa waxaa Dheeho, dib uga soo laabanaya Dhaashane, waxayna kala maqnaanayaan muddo aad u fog. Muddadaan ay lammaanuhu kala abaadeen oo ay waayuhu kala qabbireen ayaa waxaa kansho ka dhex helaya Dheeho adeerkeed, isla jeerkaasna Dheeho adeerkeed Jimcaale, waxaa usoo gole fadhiisanaya, oday cutush ah oo hoggaamiyaha beesha ah. Waa oday badar noole ah oo Ilaaheey uu maal adduunyo u gacan-geliyay ee Dheeho adeerkeed Jimcaale, ayaa wuxuu u ballan qaadayaa inuu boqol halaad oo baarkoodu siman yahay iyo baarqabkood uu siin doono haddii uu Dheeho ku mahriyo. Dheeho adeerkeed Jimcaale, dammac lixa jaceyl ayaa gelaya, wuxuuna odayga ka ballan qaadayaa inuu Dheeho jujuub iyo oggolaanshuba uu kula mahrin doono, isla markaana waxaa Dheeho adeerkeed iyo tolkeeda la siinayaa boqol halaad oo baarsimman, balse, waxa muddo laba bilood ah dib loo dhigayaa meherka Dheeho. Muddadaan kooban ayaa waxa dib usoo gurya noqonaya Dhaashane oo wardoon ah muddo fogna aan war u haayin nolol iyo

geeri waxa ay lammaantiisu ku sugneyd. Halkaas ayey iskala baxsanayaan, iyaga oo marna aayahooda dhisanaya, marna odaygaas waayeelka ah ee looga xoola qaatay booska u banneynaya. Si aan Dheeho loogu mahrin oday aan u qalmin, haddana aan doorashadeeda ku imaan.

“Gacal iyo Gayaan, waa sheeko faneed oo runtii anigu aan wax badan ka bartay, dad badan oo sidayda ahina ka baran doonaan dhaqanka, hiddaha iyo hab nololeedka ummadeed ee waaya soo jiray iyo kuwa weli taagan, sidoo kale, tilmaamidda kuwa soo muuqdo. Gacal iyo Gayaan, waa sheeko leh bar billow iyo mid dhammaadba, balse, inta aad sheekada magaca ku xusan daba socoto ayaad si dadban iyo si mararka qaarkoodba toos ah u baraneysaa, waxa kale oo ujeeddada kore aadba is leedahay waa ay ka dhumuc iyo lixaad weyn tahay.”

- Dr. Xuseen M. Cabdulle “Wadaad”

Aqoonyahan, bare, qoraa

“Dhiganahan quruxda badan ee ay magac bixintiisu tahay: “Gacal iyo Gayaan” wuxuu ku barayaa, hab nololeedka miyiga oo dhan walba leh, gaar ahaan dadka iyo degaanka ay ku dhaqan yihiin iyo hababka wada noolaashahooda, iyaga oo dugsanaya hannaan ah “Dhiig iyo dhalasho-wadaag abtirsi leh oo dhibkii dhex mara xeer looga dhigo, dhur iyo dhaqan-wadaag”. “Gacalka iyo gayaanka” uu curiyahu is raaciyay ee ku saleysan magaca Buuggani, wuxuu ibbo fur u yahay, sheeko faneed dhex maraysa, lab iyo dheddig is xushay oo barbaarta miyiga ah, kuwaasi oo wadaagaya dareen laxaweed laab mirasho leh oo dhinacya badan ka ifinaya dhaqannadii hore ee ku abbaarnaa xodxodasho ama haasaawe gundhiggiisu yahay dadabgal guur, kaasi oo ah, ab laga soo gaaray Soomaalida miyiga ku dhaqan oo aad u dhawrta kuna dhaadata.”

- Bashiir Cali Xuseen

Hoobal, qoraa, barbaariye

“Dhiganaha Gacal iyo Gayaan marka aad si wanaagsan u aqrisid isna dul taagtid labada sadar dhexdooda, hubaal waxaad helaysaa farriin aad u dhumuc weyn. Qoraaga ayaa si farshaxannimo leh u haaneediyey sheekadan oo kulansatay, barasho afeed, mid dhaqan iyo mid sooyaalba. Waa sheeko si weyn uga hadlaysa, tagtadii bulsho waxaynu ahayn iyo habkii dadka reer guuraaga ahi u noolaayeen intaan saancaddaale iyo dhaqan shisheeye nagu milmin. Sheekadan maancuriskaa ayaa ah mid hubanti gudbinaysa farriimo badan oo waxtar iyo wanaagba u leh bulshada Soomaaliyeed, korna u qaadaysa dhaqanka iyo dad la noolaanshaha, waxaa kale oo ay ka digaysaa arrimo badan oo bulshadeennu dhaqan u leedahay, aanse wanaagsanayn.”

- Cabdiraxiin H. Galayr

Hal-abuur, qoraa

ISBN 978-91-639-6964-5
9 789163 969645

Maxay gudbineysaa sheekada Gacal iyo gayaan?

Sheekadu waxay hummaag ka dhiibeysaa noloshii hore ee bulshada soomaaliyeed. Soomaalida inta aan dadyow shisheeye ku milmin sida saancaddaalihii gummeysta ahaa ka hor sida ay noloshoodu aheyd ayey hummaag mug leh ka soo tebineysaa. Waa sheeko lix ama shan boqolleey sano ka hor soomaalidu sida ay aheyd bidhaaminaysa. Sheekadu waxa ay tebinaysaa:

1. Waa sheeko, dhaqanka suubban oo ay diinta islaamku saldhig u tahay gudbineysa.

2. Waa sheeko, hiddaha iyo anshaxa san ee ku lammaanan tebineysa.

3. Waa sheeko af-barasho ah, maxaa yeelay, waxay ku dhigan tahay af-dhalad ah oo barax tiran. Waxa ku jira erayo adeegsigooda goor hore laga daldoorsaday oo ay dib usoo nooleynayso.

4. Waa sheeko dal barasho ah, maxaa yeelay, deegaanno kala duwan oo tirobadan ayaa ku jira.

5. Waa sheeko geedo barasho ah, sababtoo ah, waxa ku jira siyaabo kala duwan oo sheekada dhexdeeda geedaha loogu werinayo, sida geedaha qodaxleyda ah, kuwa aan qodaxda laheyn, kuwa lagu dheefsado xilliga jiilaalka ah ee soo fiixa, geedaha roob sugeylka leh ee looga tilmaan qaato xilliga uu roobku soo dhaw-yahay.

6. Waa sheeko duurjoog barasho ah: maxaa yeelay, waxa ku jira, duurjoogti oo idil. Sida kuwa micida wax ku ugaarsada, sida kuwa cijada ku ugaarsada iyo kuwa kale ee la ugaarsado intaba. Waxa aad ka baraneysaa alabka iyo dabeecadaha san ee LIBAAXA, habar-dugaag iyo duurjoogta kale.

7. Waa sheeko dab-joog barasho ah, maxaa yeelay, waxa aad ka dhex helaysaa dabjoogtii oo idil.

8. Waa sheeko xammaarato iyo baalalley barasho ah. Sheekada, waxa si dadban ugu jira inta bogga ku galcata iyo inta baalka ku haadda, qeybaha ay u kala baxaan. Baalalleey iyo bog ku galcato.

9. Waa sheeko murti barasho ah, maxaa yeelay, waa sheeko ku iidaaman suugaan god walbaba leh, isla mar ahaantaana hadba waxa laga sheekeynayo ku feyl xiran oo la socota.

10. Waa sheeko xiddigo barasho ah, maxaa yeelay, waxa ku hilan habka iyo sida ay soomaalidu u tilmaansan jireen xiddigaha. Taas oo aan ka fogeyn: habka san ee ay diintu tilmaantay. Xiddigaha cirka ku yaalla diintu seddax tilmaamood ayey ka bixisay. Seddaxdaas oo kala ah:

    - Bilcin iyo iftiimin sammada lagu qurxiyey.
    - In lagu rajmiyo ama lagu gemmo sheydaanka.
    - In ay aadanuhu ku tilmaansadaan oo ay astaan iyo summad u noqdaan.

11. Waa sheeko **gudniinka fircooniga** ah si dadban uga hadleysa. Gudniinka sidiisaba waxa loo qeybiyaa seddax. Mid waajib ah. Mid sunno ah iyo xaaraan ah oo aan bannaaneyn. Haddii aan kala qaado seddaxdaas waxay kala yihiin sidaan:

- Kan waajibka ah: Gudniinka waajibka ahi, waa kan labka ama ragga. Waxaana asal u ah oo laga soo hidda raacay; nabi Ibraahim c.s. Nabi Ibraahiim c.s. Wuxuu is guday asiga oo 80-sano jir ah. Dhalashadii wiilkiisa nabi Ismaaciil c.s. 19-sano ka hor ayuu is guday nabi Ibraahiim c.s. Ismaaciil wuxuu dhalay asiga oo 99-jir ah, halka Nabi Isxaaq c.s. Uu dhalay asiga oo jira: 112-sano. Isxaaq ayaana Ismaaciil ka yar 13-sano. Carabtii jaahiliga aheydna waxay labka ama wiilasha gudi jireen: maalinta toddobaad ee dhalashadiisa. Suubbanaha s.c.w. Waxaa la guday maalinkii toddobaad ee dhalashadiisa. Diinta islaamkuna dhaqankaas ayey sugtay oo waxa sunno ah in wiilasha la gudo maalinka toddobaad ee dhalashadiisa.

- Kan sunnada ah: Gudniinka sunnada ah waa kan dheddigga, balse, habka iyo sida loo gudayo is af-garan waa xagga madaahibta ah ayaa ka jira. Afarta madhab ee islaamka ugu weyn maanta, qoloba si ayey qabtaa, qoloda ugu fog ayaa waxay leedahay: waa in la dhiijiyaa oo dhiig yar laga keenaa, hadda waa dhiig yar! Imaamu Axmed wuxuu leeyahay: *"AL-KHITAANU waajibun cala rijaali wa nisaa'i".* Gudniinka wiilasha iyo gabdhuba waa waajib. Balse, ujeedku waa in la sunneeyo oo dhiig uun laga keeno ee in bir af leh lala dhexqaado ma ahan!. Taasi waa wax reebban!

- Kan xaaraanta ah oo aan bannaaneyn marnaba! Gudniinka fircooniga ah marnaba ma bannaana, diintuna waa ay diidday! Haddaba, sheekadu is barbardhiggaas gudniinka ah kama ay hadleyso, balse, waxay hummaag dul ka xaadis ah ka bixineysaa: dhaqankaas baas ee fircooniga ah goorta uu billaawday, sababta uu ku billowday, cidda ay soomaalidu ka hidda raaceen iyo cidda loo tiiriyo asal ahaantiisa.

12. Waa sheeko ka hadleysa hababka iyo sidii ay ku dhalan jireen colaadaha soomaalida. Tusaale: qolo ayaa nin laga dilayaa, iyaguna dhowr qof oo kale ayey ku soo aaranayaan. Aarashadii ayaa waxay gaareysaa boqollaal qofood. Dhanka kale, libaax ayaa wiil halyaay ah cunaya, balse, in cid kale loo dilo iska daayee aan libaaxii xitaa la raadineyn oo aan la soo dileyn. Halkaas oo laga qaadanayo soomaalidu inay iyagu isu xoog weynyihiin. Garaadkana aan wax lagu miisaamin.

13. Waa sheeko haba yaraatee aan magaalo raad ku laheyn. Mar haddii aysan sheekada dhaqanka magaaleedku ku jirin, afka lagu hadlayaana waa mid ka caaggan afafka dhawaan galaha ah iyo dhaqanka dib ka gaarka ah ee ay magaaladu leedahay!.

14. Waa sheeko qaamuus ah, maxaa wacay, waxaa ku jira sheekada; 260-eray oo la eray furay. Si loo garto waxa ay yihiin macno ahaan iyo af ahaanba!.

15. Waa sheeko ku dhigan af-dhalad ah, mar haddii afka lagu qoray uu dhalad yahay dadka qaarkood ayey ku adkaaneysaa aqrinteedu. Waana sababta ka dhigeysa sheeko qaamuus ah.

Halkee ayaad ka helaysaa dhiganaha GACAL IYO GAYAAN?

Dhiganaha: GACAL IYO GAYAAN iyo dhammaan qoranayaasha kale ee uu qoray Xasan Shiribmaal, waxa aad ka heli kartaa ama aad ka dalban kartaa qoraha op aad kala xariiri karto cinwaannadaan kala ah:

cuute23@hotmail.com
shiribmaal@gmail.com
www.laashin.com
laashin77@gmail.com
Tel: +46700345789

Meelaha kale aad ka heli karto buugga: GACAL IYO GAYAAN

www.shabeelebookshop.com Iswidhan (Sweden) iyo dhammaan waddamada Yurub.

Soomaliya:

1. Muqdisho.
2. Hargeysa.
3. Jigjiga.
4. Garoowe.

Iyo magaalooyin kale oo badan!